Waa Nuqul Dawli ah – lama iibin karo

| JAMHUURIYADDA | | SOMALILAND |
|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH

| SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE | أَلنَّشرة الرَّسمية لجمهورية صوماليلاند |
|---|---|

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
JSL, HARGEYSA
*E-mail: Garyaqaankaguud@gmail.com*

| Sanadka: 5aad | Cadadka: 9aad ee September | Taariikh: 01/10/2016 |
|---|---|---|

**QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.**
**RUKUNKA (Subscription):**

*QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.*

**TUSMADA CADADKA**

| | |
|---|---|
| **QAYBTA KOWAAD: XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:** | |
| 1) Sooma Bixin | |
| **QAYBTA LABAAD: XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOOYINKA MADAXWEYNAHA:** | |
| 2) **XEER MADAXWEYNE : 0678/082016** Magacaabid | **886** |
| 3) **XEER MADAXWEYNE : 0679/082016** Magacaabid | **887** |
| 4) **XEER MADAXWEYNE : 0680/082016** Magacaabid | **888** |
| 5) **XEER MADAXWEYNE : 0690/082016** | **889** |

Magacaabid

6) **<u>XEER MADAXWEYNE</u>** <u>: 0695/082016</u> Beddel — 890

7) **<u>XEER MADAXWEYNE</u>** <u>: 0704/092016</u> Magacaabid Guddi — 891

8) **<u>XEER MADAXWEYNE</u>** <u>: 0704/092016</u> Bixin Derajo — 893

9)

## <u>QAYBTA SADEXAAD:</u> DIGREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA, AMARADA & XEER NIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA, IWM

9) Sooma Bixin

## <u>QAYBTA AFRAAD:</u> AMARADA & GO'AANADA MAAMUL

10) Diiwaan Gelin Shirikada ISTAAHIL GENERAL TRADIN COMPANY — 894

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

11) Diiwaan Gelin Shirikada LEMON AGRICAULTURE & GENERAL TRADING — 895

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

12) Diiwaan Gelin Shirkada KING SOLOMON ENERGY — 897

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

13) Diiwaan Gelin Shirkada GAHAYR TRADING COMPANY — 898

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

14) Diiwaan Gelin Shirikada KULANLE COMPANY — 899

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

15) Diiwaan Gelin Shirikada HORN INTERNATIONAL TRADING COMAPANY — 901

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

16) Diiwaan Gelin Shirikada SAVANA CONSULTANCY & RESEARCH SERVICE LTD — 902

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

17) Diiwaan Gelin Shirikada SPEED CONNECT — 904

CARGO COMAPNY

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

18) Diiwaan Gelin Shirikada SASO LTD — 905

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

19) Diiwaan Gelin Shirikada SOMALILAND CONCRETE COMPANY — 907

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

20) Diiwaan Gelin Shirikada CJX TRADING LIMITED — 908

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

21) Diiwaan Gelin Shirikada HONEY SHIPPING AGENCY & CLEARANCE FORWADING AGENCY — 909

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

22) Diiwaan Gelin Shirikada NADIIF GENERAL TRADING COMAPNY — 911

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

23) Diiwaan Gelin Shirikada GENIACADE LTD COMPANY — 912

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

24) Diiwaan Gelin Shirikada SAYID ALI TRADING & CONSTRUCTION COMPANY — 914

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

25) Diiwaan Gelin Shirikada ANCAMTA CONSTRUCTION COMPANY — 915

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

26) Diiwaan Gelin Shirikada BADBAADO OCCUPATIONAL SAFETY COMPANY — 916

**<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>**

27) QARAAR DIB-U-EEGIS QARAAR FASIRAAD,

**<u>Maxkamadda Dastuuriga ah</u>** — 918

28) Baafin Racfaansane,

**<u>Maxkamadda Racfaanka Gobolka M/Jeex</u>** — 921

29) Amar Xayiraad Beer

**<u>Maxkamadda Sare JSL</u>**

30) Amar XAYIRAAAD KA QAADIS DHUL — 922

**<u>Maxkamada Gobolka M/Jeex</u>** — 924

31) AMAR U MADAX-BANAANAYN DHUL

**<u>Maxkamada Gobolka M/Jeex</u>**

32) AMAR U MADAX-BANAANAYN BALOODHO — 927

*QAYBTA SHANAAD* : **OGEYSIISYADA**

***Sooma bixin***

# QAYBTA LABAAD:

## XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOOYINKA MADAXWEYNAHA:

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-6178/082016 DATE....14/08/2016

## XEER MADAXWEYNE Lr: 0678/082016

## Magacaabid

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka (J) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda ay Hay'adda Shaqaalaha Dawladu u leedahay dhismaha Qaranka; |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo buuxinta jagada Gudoomiyaha Hay'ada Shaqaalaha Dawlada ee JSL; |

| | |
|---|---|
| Markuu ka Fiirsaday: | kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku Qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, Sharmaarke Axmed Muxumed Geelle, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiyaha Hay'ada Shaqaalaha Dawlada ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4179/082016 DATE....14/08/2016

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0679/082016

# Magacaabid

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda Dekadu u leedahay Dhismaha Qaranka; |

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo buuxinta jagada Maareeyaha Dekeda Berbera ee Jamhuuriyadda Somaaliland; |
| Markuu ka Fiirsaday: | kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku Qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, Axmed Yuusuf Dirir, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeyaha Dekeda Berbera ee Jamhuuriyadda Somaaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4180/082016 DATE....14/08/2016

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0680/082016

# Magacaabid

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda Dekadu u leedahay Dhismaha Qaranka; |

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo buuxinta jagada Maareeye ku-xigeenka Dekada Berbera ee Jamhuuriyadda Somaaliland; |
| Markuu ka Fiirsaday: | kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku Qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**<u>Wuxuu Go'aansaday</u>**

In Mudane, Cabdi Cabdillaahi Xasan Mataan, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeye ku-xigeenka Dekada Berbera ee Jamhuuriyadda Somaaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
<u>Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland</u>

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

<u>THE PRESIDENT</u>

JSL/M/XERM/249-4190/082016 DATE....14/08/2016

## <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0690/082016</u>

## Magacaabid

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, xarafka d ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Laanta socdaalku u leedahay Dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Taliyaha Laanta Socdaalka ee Jamhuuriyadda Somaaliland;

Markuu ka Fiirsaday: kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu Go'aansaday**

In Sareeye Guuto, Maxamed Cismaan Caalin (Dayib), laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Taliyaha Laanta Socdaalka ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4201/082016 DATE....14/08/2016

## XEER MADAXWEYNE Lr: 0694/082016

## Beddel

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda Weyn ee ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Wasiiru-dawlaha Wwasaaradda Caafimaadka ee Jamhuuriyadda Soomaaliland;

Markuu ka Fiirsaday: kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, Maxamed Aadan Jaamac Galaal, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Caafimaadka ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4264/092016 DATE....19/09/16

## XEER MADAXWEYNE Lr: 0704/092016

# Magacaabid Guddi

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda Guddida Sare ee Jaamacada Hargeysa u leedahay Dhismaha Qaranka; |
| Markuu Ku Qancay: | In la badalo gudidii hore ee mudada dheer soo shaqaynaysay; |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo magacaabida Guddida Sare ee Jaamacada Hargeysa (Board of Trustees for University of Hargeisa); |

**<u>Wuxuu Go'aansaday</u>**

In uu magacaabo Guddida Sare ee Jaamacada Hargeysa (Board of Trustees for University of Hargeisa) oo ka kooban 11-xubnood oo faahfaahintoodu hoos ku xusan tahay:

1. Mudane, Cabdi-samad Cumar Maal Garyaqaanka Guud (Gudoomiyaha Guddida).
2. Nafiisa Yuusuf Aw Muxumed Negaad (Guddoomiye Ku-xigeenka Guddida).
3. Abdillaahi Ibraahin Habane Wasiirka Waxbarashada & Tacliinta Sare.
4. Cali Cabdillahi Daahir Madaxa ICT Commission-ka.
5. Liibaan Ismaaciil Maxamuud Guddida Xuquuqal Iinsaanka.
6. Cabdiraxmaan Maxamuud Caydiid Duqa Caasimada Hargeysa.

7. Dr. Maxamuud Yuusuf Muuse    Gudoomiyaha Jaamacadda Hargeysa.
8. Maxamed Faarax Xirsi    Akaadamiga Nadadda iyo Horumarinta.
9. Cabdirashiid Maxmed Siciid    Ganacsatada.
10. Cabdikariin Maxamed Iid    Ganacsatada.
11. Suldaan Axmed Daahir Muuse    Culimada.

Guddidu waxay xilkooda u gudan doonan si waafaqsan shuruucda dalka iyo xeerka Jaamacada Hargeysa.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-4275/092016    DATE....25/09/016

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0704/092016

## Bixin Derajo

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad, Faqradiisa 4aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Arkay: | Qoraalka Guddida dib-u-sixida Derajooyinka iyo Nidaamka xaqsiinta Ciidamada eek u |

| | |
|---|---|
| | taariikhaysan 20/09/16, ujeedadiisuna tahay Darejo siinta Ciidamada Qaranka |
| Markuu Garwaaqsaday: | Xilka naf-hurida iyo heeganka joogtaysan ee ay Qaranka u hayaan; |
| Markuu Ku Qancay: | In bixinta derajadu ay kor u qaadi doonto milgaha, sharafta iyo haybadda Dawladnimo; |

**Wuxuu Go'aansaday**

In 59-Sarkaal oo ka tirsan Saraakiisha Ciidanka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland ee tafaasiishooda iyo Astaamahooduba ku cad yihiin qoraalka Xeerkan ku lifaaqan, la siiyo darejooyinka ay mudan yihiin.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# QAYBTA AFRAAD:

# AMARADA & GO'AANADA MAAMUL

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/199/2016. 31/08/2016

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, ISTAHIL GENERAL TRADING, oo ay ku cadyihiin xubnaha shirikadu, sida ku cad qodonka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay ISTAHIL GENERAL TRADING, **Astaanteeduna tahay:-** (Xarfaha IGTC), shaqadeeduna tahay Soo Dejinta Allaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 31/08/2016.

Allaa Mahad Leh

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/200/2016. 31/08/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. **(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, LEMON AGRICULTURE & GENERAL TRADING

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka

11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, LEMON AGRICULTURE & GENERAL TRADING**, Astaanteeduna tahay: -** (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay Soo Dejinta Allaabooyinka (import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeisa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 31/08/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/202/2016. 31/08/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. **(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, KING SOLOMON ENERGY.

**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

<u>Wuxuu Diiwan Geliyey.y</u>

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, KING SOLOMON ENERGY COMPANY**, Astaanteeduna tahay: -** (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay Tamar dhalinta dacbiiciga ah, (Green Energy), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 31/08/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**<u>Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.</u>**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

<u>XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD</u>

XIG/JSL/205/2016. 31/08/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. **(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, GAHAYR TRADING COMPANY

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay GAHAYR TRADING COMPANY**, Astaanteeduna tahay: -** (magaca shirikada), shaqadeeduna tahay Soo dejinta alaabooyinka (import) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 31/08/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/206/2016. 28/08/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. **(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, KULANLE COMPANY.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, KULANLE COMPANY**, Astaanteeduna tahay:-** (Geedka Kulanka), shaqadeeduna tahay ganacsi guud (General Trading), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeisa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 31/08/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/208/2016. 04/09/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya

xafiiska Xeer ilaalinta guud inay diiwaan geliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HORN INTERNATIONAL TRADING COMPNAY, oo ay ku cadyihiin xubnaha shirikadu, sida ku cad qodonka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamilayda Shirkadda ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee xeerka Shirikadaha.

<u>Wuxuu Diiwan Geliyey.y</u>

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, HORN INTERNATIONAL TRADING COMPANY**, Astaanteeduna tahay:-** (Xarfaha HITCO), shaqadeeduna Soo dejinta Alaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeisa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 04/09/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**<u>Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.</u>**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/210/2016. 04/09/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka jamhuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha**.**

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, SAVANA CONSULTANCY & RESEARCH SERVICE LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, SAVANA CONSULTANCY & RESEARCH SERVICE LTD**, Astaanteeduna tahay:-** (Saddex xagal dul saran laba laydi oo isleeg iyo xariijin hoosta ka marsan), shaqadeeduna tahay bixinta adeegyada tallo bixinta horumarinta iyo cilmi baadhsita (Research and development consultancy), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 04/09/2016.

Allaa Mahad Leh.

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/211/2016. 04/09/2016

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, SPEED CONNECT CARGO COMAPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku ad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Comapnay law.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, Saamiyadooduna ay sugan yihin.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay SPEED CONNECT CARGO COMPNAY**. Astaanteeduna tahay:-** (Goobo afar gees ah oo uu ku dhex sawiran yahay baabuur wayni, magaca shirikaduna ku hoos qoran yahay), shaqadeeduna tahay bixinta adeegyada saad siinta, rarida iyo dejinta (Logistics, Clearance & forwarding), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 04/09/2016.

Allaa Mahad Leh

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/212/2016. 04/09/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, SASO LTD, oo ay ku cadyihiin xubnaha shirikadu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **SASO LTD: - Astaanteeduna tahay** (SASO), shaqadeeduna tahay Soo dejinta Alaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 04/09/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/213/2016. 04/09/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. (**Sole Proprietorship**)

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay SOMALILAND CONCRETE COMPANY.

**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland,

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

<u>Wuxuu Diiwan Geliyey.y</u>

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, SOMALILAND CONCRETE COMAPANY**, Astaanteeduna tahay:-** ( Xarfaha SCC), shaqadeeduna tahay dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 04/09/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**<u>Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.</u>**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

<u>XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD</u>

XIG/JSL/214/2016. 07/09/2016

<u>Hargeysa.</u>

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

<u>Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.</u>

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. **(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay CJX TRADING LIMITED.

**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay:-** Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**<u>Wuxuu Diiwan Geliyey.y</u>**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashantahay shirkada magaceedu yahay CJX TRADING LIMITED**,** **Astaanteeduna tahay:-** (Magaca Shirkada) , shaqadeeduna tahay dhoofinta xabagta iyo faleemka (Export) xarunteeduna tahay Magaaladda Gabiley, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 07/09/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**<u>Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.</u>**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/215/2016. 11/09/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay HONEY SHIPPING AGENCY & CLEARANCE FORWADING COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company law.

**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashantahay shirkada magaceedu yahay HONEY SHIPPING AGENCY & CLEARANCE FORWADING COMPANY, **Astaanteeduna tahay:-** (Markab Magaca Shirkadu ku hoos qoran yahay) , shaqadeeduna tahay wakiilnimada maraakiibta iyo rarista iyo dejinta (Shipping agency and clearance forwadind) xarunteeduna tahay Magaaladda Berbera, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 11/09/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/216/2016. 14/09/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. **(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay NADIIF GENERAL TRADING COMPANY.

**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashantahay shirkada magaceedu yahay NADIIF GENERAL TRADING COMPANY**, Astaanteeduna tahay:-** (Goobo afar gees ah oo ay ku dhex jiraan xarfaha NG) , shaqadeeduna tahay ganacsi guud (General Trading) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 14/09/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/217/2016. 14/09/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. **(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay JENIACADE LTD COMPANY.

**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashantahay shirkada magaceedu yahay JENIACADE LTD COMPANY**,** **Astaanteeduna tahay:-** (magaca shirikada) , shaqadeeduna tahay soo dejinta alaabooyinka (import) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 14/09/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/220/2016. 18/09/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. **(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay SAYID ALI TRADING & CONSTRUCTION COMAPANY.

**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka

11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashantahay shirkada magaceedu yahay SAYID ALI TRADING AND CONSTRUCTION COMAPNY**, Astaanteeduna tahay:-** (Xarafaha SATC) , shaqadeeduna tahay ganacsi guud iyo dhismaha (General Trading and construction) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 18/09/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/221/2016. 18/09/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. **(Sole Proprietorship)**

**Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya

Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay ANCAMTA CONSTRUCTION COMPANY

**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashantahay shirkada magaceedu yahay ANCAMTA CONSTRUCTION COMPANY**, Astaanteeduna tahay: -** (magaca shirikada oo ku qoran far doog ah oo ka hooseeya buur), shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 18/09/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/222/2016. 18/09/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay BADBAADO OCCUPATIONAL SAFETY COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company law.

**Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaangashantahay shirkada magaceedu yahay BADBAADO OCCUPATIONAL SAFETY COMPANY**, Astaanteeduna tahay: -** (Qof

badbaadinaya qof kale), shaqadeeduna tahay bixinta adeegyada badbaadinta shaqaalaha goobaha shaqada (Labor Safety Service) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 18/09/2016

Allaa Mahad Leh.

**(Yuusuf Sh. C/laahi Kaahin)**

**Ku Simaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

## JAMHUURIYADA SOMALILAND

## MAXKAMADDA DASTUURIGA AH

Constitutional Court المحكمة الدستورية

**MD/DD/ 02/2016** **Taariikh: 26/09/2016**

**Ujeedo: Qaraarka Dib-u-eegista Qaraar Fasiraad Lr. MS/DD/02/2015 ee 18/08/2015**

Maxkamadda Dastuuriga JSL. Oo ka kooban:

1. **Aadan Xaaji-Cali Axmed** **Gudoomiye**
2. **Maxamed Cumar Geelle** **Xubin**
3. **Cabdiqaadir Axmed Maxamuud** **Xubin**
4. **Maxamed Faarax Siciid** **Xubin**
5. **Axmed Diiriye Qaalib** **Xubin**
6. **Cali-Shucayb Sh. Ibraahim Nuur** **Xubin**
7. **Cabdiraxmaan Jaamac Hayaan** **Xubin**
8. **Cabdillaahi Cabdi Aadan** **Xubin**

9. **Cabdiraxmaan Xuseen Caynaan** **Xubin**

10. **Cabdiraxmaan Xasan Nuur** **Xubin**

**<u>Asbaabtii Qaraarka</u>**

**<u>Maxkamadda Dastuuriga ah ee JSL: -</u>**

**Markii ay aragtay:** Codsiga dib u eegista ah ee Madaxweynaha JSL ee sumaddiisu tahay JSL/MD/100-4265/092016 kuna taariikhaysan 20/09/2016 ee uu ku codsanayo in Maxkamada Dastuuriga ah ee JSL dib u eegis ku samayso qaraarkeedii fasiraadda ahaa ee sumadiisu ahayd MS/DD/02/2015 ee 18/08/2015.

**Markay deristay:-** Qoraalkii fasiraada ahaa ee Maxkamadda Dastuuriga ah ee JSL ee Summadiisu ahayd MS/DD/02/2015 kuna taariikhaysnaa 18/08/2015.

**Markay deristay: -** Go'aankii Golaha Wakiilada JSL ee summaddiisu ahayd GW/KF-31/708/2016 kuna Taariikhaysan 17/09/2016 ee ay ku ansixiyeen kala qaadida labada Doorasho ee Madaxtooyada iyo Golaha Wakiilada JSL.

**Markay aragatay:-** Asbaabta uu Madaxwaynaha JSL u cuskaday codsiga dib-u-eegista Qaraarkii Fasiraada ee Maxkamadda Dastuuriga JSL. ee kor ku xusan.

**Markay la tashatay: -** Axsaabta Qaranka JSL ee UCID, KULMIYE iyo WADANI.

**Markay la tashatay: -** Gudida Doorashooyinka Qaranka JSL.

**Markay aragtay: -** Qodobada 97, 98 ee Dastuurka JSL iyo Qod. 15 ee Xeerka Nidaamka Garsoorka iyo 334 ee Xeerka Habka Madaniga ah.

**Markay aragtay: -** dhamaan asbaabta kor ku xusan waxay soo saartay qaraarkan soo socda.

## **Qaraarkii Maxkamadda**

Maxkamadda Dastuuriga ah ee JSL:-

1. Waxay aqbashay codsiga dib u eegista ee Madaxweynaha JSL ee sumadiisu tahay JSL/MD/100-4265/092016 kuna taariikhaysan 20/09/2016 ee uu Maxkamadda Dastuuriga ah ee JSL kaga codsanayay in ay dib u eegis usameyso qaraarkeedii fasiraada ahaa ee sumadiisu ahayd MS/DD/02/2015 ee ku taariikhaysnaa 18/08/2015.

2. Waxay wax ka badashay qaraarkii Maxkamada Dastuuriga ah ee JSL ee sumadiisu ahayd MS/DD/02/2015 ee ku taariikhaysnaa 18/08/2015.

3. Waxay qaraarisay in la kala qaado labada doorasho eek ala ah doorashada Madaxtooyada (Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka) iyo doorashada Golaha Wakiilada JSL iyadoo doorashada Madaxtooyadu ay qabsoomi doonto xiligii ay Maxkamadda Dastuuriga ah ee JSL hore u qaraarisay ee 28/03/2017, iyada oo doorashada Golaha Wakiiladuna uu Golaha Guurtida JSL waajibkiisa dastuuriga ah ka gudan doono bil ka hor dhamaadka mudo-xileedkooda si waafaqsan Qod. 42aad, xubintiisa 3aad ee Dastuurka JSL.

4. Qaraarkan waxa loo cuskaday qodobada 97, 98 Dastuurka JSL, iyo Qod. 15 XNG, iyo 334 XHM.

5. Qaraarkani wuxuu soo baxay maanta oo ay taariikhdu tahay 26/09/2016.

**Guddida Garsoorka**: -

1. **Aadan Xaaji-Cali Axmed** **Gudoomiye**________________

2. **Maxamed Cumar Geelle** **Xubin**______________________

3. **Cabdiqaadir Axmed Maxamuud** **Xubin**______________________

4. **Maxamed Faarax Siciid** **Xubin**______________________

5. **Axmed Diiriye Qaalib** **Xubin**______________________

6. **Cali-Shucayb Sh. Ibraahim Nuur** **Xubin**______________________

7. **Cabdiraxmaan Jaamac Hayaan** **Xubin**______________________

8. **Cabdillaahi Cabdi Aadan** **Xubin**______________________

9. **Cabdiraxmaan Xuseen Caynaan** **Xubin**____________________

10. **Cabdiraxmaan Xasan Nuur** **Xubin**_____________________

**Sahra Ismaaciil Cabdillaahi** **Kaaliye Sare** _____________

## JAMHUURIYADA SOMALILAND

## MAXKAMADDA Racfaanka Gobolka M/Jeex HARGEISA

Hargeisa District Court

**MJ/DRGML/DMR/116/2016** **29/09/2016**

Ku: Radio Hargeisa

Ku: Garyaqaanka Guud Ee Qaranka J.S.L

Ku: Wargeys-yada Madaxa Banaan ee Hargeysa

Ujeedo: - **Baafin Racfaansane Magaceedu tahay (Ifraax Cismaan Waabari)**

Maxkamadda Rafcanka Gobolka maroodijeex ee Hargeysa waxay baafinaysaa racfaansanta magaceedu sare ku xusan tahay in ay ku timaado mudo dhan (15) cisho oo ka bilaabmaya marka laga baafiyo idaacada radio hargeysa iyo wargeysyada madaxa banaan ee hargeysa kasoo baxa.

Dacweysanta waxa lagu amrayaa in ay dhawrto wakhtiga loo qabtay ee ay maxkamadu u mudeysay in ay ku timaado hadii aad ku iman weydo maxkamadu waxay kaa qaadi doontaa talaabo sharci ah oo la xidhiidha arintaada.

Maxkamadu waxay ucuskatey qodobka sharci ee 121 XHM.

AALLAH Mahad Leh

Sh Axmed Aadan Mirre

Garsooraha: Maxkamadda racfaanka G/M/JEEX Hargeysa

Kaaliye: c/lahi axmed xasan

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**MAXKAMADDA SARE EE JSL**

**MS/735/016** **03/09/016**

Ku: Taliyaha Qaybta Gobolka Togdheer ………… =Burco=

Ku: Taliyaha Saldhiga Dhex Burco…………………=Burco=

Og: Maxkamada Racfaanka Togdheer……………. =Burco=

Og: Racfaanlayaal: Ilma Suudi Maxamed Cabdi…=Burco=

Og: Racfaansanayaal: Ilma Jamac Gaaxnuux…… =Burco=

Og: Jaraa'idka Madax Banaan......................=Hargeysa=

Og: Raadyo Hargeysa..................................= Hargeysa=

Og: Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka JSL =Hargeysa=

**UJEEDO: AMAR Xayiraad Beer Cabirkeedu Dhan Yahay (15) Hector Ku Taala Degmada Burco Xaafada Maxamed Cali**

Maxkamada Sare ee JSL

Markay Aragtay: galdacwadeedka madaniga ah ee sumadiisu tahay MS/735/016, dhinacyaduna kala yihiin Racfaanlayaal: Ilma suudi maxamed cabdi wakiilna u yahay siciid suudi maxamed, racfaansanayaalna ka yihiin: Ilma Jaamac Gaaxnuug wakiil u yahay: Maxamuud jaamac Gaaxnuug.

Markay Aragtay: Arjiga codsiga xayiraada dhulka eek u taariikhaysan 31/08/016 ee uu soo gudbiyay maxkamada qareenka racfaansanayaasha qareen c/nasir maxamed shide kuna codsanayaan in loo xayiro dhul beereed cabirkiisu dhan yahay (15) Hector.

Markay Aragtay: Dhamaan asaabta sare ku xusan iyo qodobada 293, 294, 296 XHM waxay Maxkamada sare soo saartay xayiraadan

**Xayiraada Maxkamadda**

1. Maxkamada sare JSL, waxay xayirtay dhul beereedka cabirkiisu dhan yahay (15) Hector, ee ku yaala xaafada Maxamed Cali jihooyinkiisuna kala yihiin:-

   - Bari/waqooyi/Galbeed-Waddo

- o Koonfur/ Beerta Caawiye

2. Beertan la xayirey lama dhisi karo, lama iibin karo, lama rahmi karo, lama qodi karo, waxna lagama badali karo, lama hibeyn karo, sifo kalena looma isticmaali karo ilaa amar danbe kasoo baxayo Maxkamadda Sare JSL.

3. Xayiraadani waxay soo baxdey maanta oo ay taariikhdu tahay 03/09/2016.

**Waxa soo saaray Xayiraadan Gudiga Garsoorka Maxkamada sare JSL ee kala ah:**

1. **C/raxmaan Jaamac Hayaan (Gudoomiye)................**
2. **Yaxye Cali Idiris (Xubin)........................**
3. **C/raxmaan Xuseen Caynaan (Xubin)........................**

**C/salaam Muuse Ducaale**

**Kaaliyaha Maxkamadda Sare JSL**

## JAMHUURIYADA SOMALILAND

## Maxkamadda Gobolka M/ Jeex, Hargaysa

**MGH/DFL/61/2016** **Date:-18/09/2016**

ku: Taliyaha Saldhiga Boliska A/dhagax =Hargaysa=

Og: Taliyaha Booliska Q/galbeed =Hargaysa=

Ku: Gudoomiyaha Degmada Axmed dhagax =Hargaysa=

Ku: Idaacada Radio Hargaysa =Hargaysa=

Ku: Warbaahinta Madaxa Bannaan =Hargaysa=

Og: Xoghayaha Dawlada Hoose ee Hargaysa =Hargaysa=

Og: Maayirka Caasimada J.SL. =Hargaysa=

Ku: Garyaqaanka Guud ee qaranka =Hargaysa=

Og: Amaal Cali Haybe =Hargaysa=

Ujeedo:- Amar Xayiraad ka Qaadis Dhul cabirkiisu yahay 90X110, mitir oo ku yaala masalaha hargeisa beerta ilma qorya lacag.

*Maxkamada Gobolka Maroodi Jeex, hargaysa:-*

Markay Aragtay: Galdacwadeedka fulinta ah ee sumadiisa iyo dhinacyadiisuba sare ku xusan yihiin.

Markay aragtay: Qaraarka kasoo baxay Maxkamada Gobolka M/jeex, Hargeysa ee sumadiisu yahay MGH/DFL/61/016 ee ku taariikhaysan 29/09/016 qaraarkaas oo lagu ooday dacwada fulinta ah ee sare ku xusan.

Markay Aragtay: Codsiga xayiraad ka qaadista ah eek u / taariikhaysan 06/09/016 ee ay maxkamadda u soo qorteen qareenka soo dhexgallaha dacwadan ee magaceedu yahay Amaal Cali Haybe, kaas oo nuxurkiisu yahay in looga qaado xayiraada saran dhulkaas oo sifooyinkiisa iyo jihooyinkiisuba ay hoos ku xusan yihiin.

Markay Aragtay: Maxkamadda Gobolka Maroodi jeex Hargaysa waxay xayiraadii ka qaaday dhulka cabirkiisu yahay 90x110 mtr, kadib markay Maxkamadu qaraar kasoo saartay dacwadan fulinta ah oo ujeedadiisu yahay qaraar oodis dacwadeed, qaraarkaas sumadiisu tahay MGH/DFL/61/016 kuna taariikhaysan 29/08/2016, dhulkaasi oo jihooyinkiisu kala yihiin:-

Bari……………… Wado

Galbeed …………Wado

Koonfur………… Wado

Waqooyi …………Wado

Maxkamadu waxay u cuskatay xayiraad ka qaadista ah Qod:- 291,296 XHM, asbaabta sare ku xusan iyo qodobada sharci ee sare ku xusan darteed, waxay maxkamadu laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 18/09/016 xayiraadii ka qaaday dhulkaas sifooyinkiisu sare ku xusan yahay, dhulkaas oo ku yaala degamada axmed dhagax, gaar ahaan beerta ilma qoryo lacag, dhulkaas.

Hadaba maxkamadu waxay aqbashay codsiga xayiraad ka qaadista ah, waxayna amraysaa haayadaha ay khusayso xayiraadani inay laga bilaabo maanta looga qaaday xayiraadii Amaal Cali

Haybe dhulkaas sifooyinkiisuna sare ku xusan yahay, sidaas darteed waxay maxkamadu idin ku amraysaa inaad dhaqan galisaan isla marka uu amarkani idinso gaadho.

Wa Bilaahi Tawfiiq

(Xasan C/lahi Cawaale)

Garsooraha Maxkamada Gobolka Maroodi jeex Hargaysa.

Dayib Axmed Xasan

Kaaliyaha Maxkamada Gobolka Maroodi jeex Hargaysa.

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

## MAXKAMADDA GOBOLKA M-JEEX/REGIONAL COURT M-JEEX

## XAFIISKA GARSOORAHA

**MGH/DFL/329/2016 Sabti,September 18 2016**

ku: Taliyaha Saldhiga Boliska Degmada Axmed dhagax =Hargaysa=

ku: Taliyaha Qaybta galbeedka Booliska Hargeysa =Hargaysa=

Og: Hogaanka Hawl-galinta Ciidanka Booliska JSL =Hargaysa=

Og: Godoomiyaha Degmada Axmed Dhagax =Hargaysa=

Og: Xoghayaha Fulinta D/hoose Hargeysa =Hargaysa=

Og: Garyaqaanka Guud ee qaranka JSL =Hargaysa=

**Ujeedo: - AMAR U MADAX-BANAANAYN DHUL**

MAXKAMDA GOBOLKA M/JEEX:-

**Markaay Aragtay**: -Gal-dacwadeedka fulinta ah ee sumadiisu sare ku xusan tahay dhinacyana ka yihiin:-

- Loo Fuliye:- Maxamuud Faarax Jaamac
- Lagu fuliyayaal: - 1. Khaddar Aadan Xasan

  2. Nashaad Aadan Xasan

  3. Suhuur Aadan Xasan

  4. Ifraax Aadan Xasan

**Markaay Aragtay**:- Qaraarka Maxkamada Gobolka M/Jeex ee sumadiisu tahay MGH/01/2015 ee ku taariikhaysan 05/01/2015.

**Markaay Aragtay-** qaraarka Maxkamada Sare JSL ee sumadiisu tahay MS/372/15 ee ku taariikhaysan 31/01/16, qaraarkaas oo ay Maxkamada JSL ku ayiday qaraarka Maxkamada hoose ee Racfaanka iyo Gobolka ee Sare ku xusan.

**Markay Aragtay: -** codsiga fulin xukun lam. Ms/372/2016 dhulka ah eek u taariikhaysan 03/09/016 ee soo galay Maxmada G/M,Jeex 04/09/016 una soo gudbiyay maxmada qareenka loo fuliyaha kuna

codsaday in loo madax-banaaneeyo dhulkan. Cabirkiisuna yahay:-

**Dhulka 1aad, ee cabirkiisu yahay 12x12 Mtr jihooyinkiisuna kala yihiin**

Waqooyi……………………….wado

Koonfur……………………..dhisme

Galbeed……………………..dhisme

Bari …………………………..wado

Dhulka 2aad cabarkisu yahay 12+17x10, jihoooyinkiisuna kala yihiin

Waqooyi……………………….dhisme

Koonfur………………………wado

Galbeed……………………..dhisme

Bari …………………………..dhisme

Dhulka 3aad ee cabirkiisu yahay, 8x6m+8mx10, jihooyinkiisuna kala yihiin

Waqooyi……………………..

**Markay Aragtay**: - Asbaabtaas sare ku xusan dartood iyo ***Qod. 338, 343, 429, 292, 293, and 294 XHM*** waxay Maxkmadu soo saartay **AMARKAN U MADAX-BANAANAYNTA DHULKAN:-**

**<u>AMARKII MAXKAMADDA</u>**

***<u>Maxkmadda Gobolka M/jeex:-</u>***

1. Maxkamadu waxay amraysaa masuuliyiinta ay sida tooska ah ugu socoto qoraalkani in ay u madax banaanaysay **loo fuliyaha Maxamuud Faarax Jaamac** dhulka ku yaala degmada Axmed dhagax ee loo xukumay jihooyinkiisuna ay kala yihiin:-

**Dhulka 1aad, ee cabirkiisu yahay 12x12 Mtr jihooyinkiisuna kala yihiin**

Waqooyi.........................wado

Koonfur.........................dhisme

Galbeed.........................dhisme

Bari ..............................wado

Dhulka 2aad cabarkisu yahay 12+17x10, jihoooyinkiisuna kala yihiin

Waqooyi.........................dhisme

Koonfur.........................wado

Galbeed.........................dhisme

Bari ..............................dhisme

Dhulka 3aad ee cabirkiisu yahay, 8x6m+8mx10, jihooyinkiisuna kala yihiin

Waqooyi.........................

2. Sidaas awgeed laga bilaabo maanta 17/09/016 loo fuliyuhu way u madax-baananyihiin dhulka ku yaala dhulka cabirkiisa iyo tilmaamiihiisuba sare ku xusan yihiin, way dhisan karaan, iibin karaan sifo kasta oo sharcigu u ogolyahayna way u isticmaali karaan. Ka Dib Marka loo fuliyo.

3. Amarkan u madax-banaanaynta dhulku wuxuu soo baxay maanta oo taariikhdu tahay 18/09/016.

Wabilaahi Tawfiiq

(Guuleed Daauud Axmed)

Garsooraha Maxkamada Gobolka M/JEEX
=HARGEYSA=

**JAMHUURIYADA SOMALILAND**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

## MAXKAMADDA GOBOLKA M-JEEX/REGIONAL COURT M-JEEX

**MGH/DFL/139/2004** **20/09/016**

Ku: - Taliyaha Saldhiga Booliska I/Koodbuur =Hargeysa=

Ku: - Idaacada Radio Hargeysa =Hargeysa=

Ku: - Jaraaidka maxadaxa banaan =Hargeysa=

Ku: - Guddoomiyaha Degmada I/Koodbuur =Hargeysa=

Og: - Maayirka Caasimada Jamhuuriyadda Somaliland =Hargeysa=

Og: - Wasiirka Wasaarada Arimaha Gudaha =Hargeysa=

Og: - Hogaanka Hawlaha Booliska Jamhuuriyada Somaliland =Hargeysa=

Og: - Garyaqaanka Guud ee Qaranka =Hargeysa=

**Ujeedo: - Amar U Madax-banaanayn baloodho**

**Maxkamada Gobolka M/Jeex Hargeysa: -**

| | |
|---|---|
| Markay Aragtay: | Gal dacwadeedka fulinta ah ee sumadiisa iyo dhinacyadiisuba sare ku xusan yihiin. |
| Markay Aragtay: | Xukunka Maxkamada Gobolka Hargeysa ee sumadiiisu tahay MGH/333/2003 ee ku taariikhaysan 21/10/2003. |
| Markay Aragtay | Xukunka Maxkamada Racfaanka ee sumadiisu tahay MRH/DMRL/180/2003 ee ku taariikhaysan 19/01/2003 ee ayiday xukunka Maxkamada Gobolka M/Jeex. |
| Markay Aragtay: | Xukunka Xukunka Maxkamada Sare ee J.S.L sumadiisuna tahay MS/DM/48/2004 ee ku taariikhaysan 27/01/2005, ee ayiday xukunka Maxkamada Racfaanka Gobolka M/Jeex. |
| Markay Aragtay: | Codsiga cadeynta faysal sharci eek u taariikhaysan 28/09/2015 soona galay Maxkamada Gobolka M/Jeex 03/10/2005. |
| Markay Aragtay: | Qoraalka Maxkamada Gobolka Hargeysa u Dirtay D/hoose ee Hargeysa ujeedadiisuna tahay soo cadeyn fayl lahaansho sharci eek u taariikhaysan 10/10/2015. |
| Markay Aragtay: | Warqada Jawaabta D/hoose eek u taariikhaysan 27/02/2016 ee ay ku |

cadeeyeen fayl lahaansho sharci ah ee ka baxay dhulka iyo cida leh:

Markay Aragtay: codsiga Wakiilka loo fuliyeyaasha eek u taariikhaysan 24/08/2016 soona galay maxkamada gobolka hargeysa 24/08/2016 ujeedadiisuna tahay codsi madaxbaanayn dhul degmada ibraahim koodbuur, xaafada jigjiga yer, agagaarka maansoor hotel ku yaala cabirkiisa iyo jihooyinkiisuba kala yihiin.

1. Baloodhka 1aad: - 24x18m

   Jihooyinkiisuna kala yihiin

   Bari/koonfur-Wado Waqooyi/Galbeed-Dhisme

2. Baloodhka 2aad: - 24x18m

   Jihooyinkiisuna kala yihiin

   Koonfur -Wado Bari/ waqooyi /Galbeed-Dhisme

3. Laba Baloodh oo cabirkoodu yahay: - 48x18m

   Jihooyinkiisuna kala yihiin

   Koonfur/waqooyi-Wado Bari/Galbeed-Dhisme

4. Baloodhka 4aad: - 24x18m

   Jihooyinkiisuna kala yihiin

   Bari/Koonfur-Dhisme Waqooyi/Galbeed-Wado

Markay Aragtay: -Asbaabaha sare ku xusan dartood iyo Qod 272, 338, 340, 343, XHM iyo Dhamaan asbaabahaasi sare ku xusan dartood waxa ay maxkamadu soo saartay Amarkan Madax Banaanaynta ah.

## ***Amar U Madax Baanayn Dhul***

1. Maxkamdu waxay U Madax_banaanaysay loofuliyayaasha ilma Dalmar Kaariye oo uu wakiil u yahay Maxamud Xaashi Axmed, magacyadooduna kala yihiin: -

   - Nadiifo Dalmar Kaariye
   - Xuseen Dalmar Kaariye
   - Cumar Maxamed Dalmar

2. Dhulka ku yaala degmada ibraahim koodbuur, xaafada jigjiga yer, agagaarka maansoor hotel, cabirkisa iyo jihooyinkiisuba kala yihiin sidan.

   1. Baloodhka 1aad: - 24x18m

   Jihooyinkiisuna kala yihiin

   Bari/koonfur-Wado Waqooyi/Galbeed-Dhisme

   2. Baloodhka 2aad: - 24x18m

   Jihooyinkiisuna kala yihiin

   Koonfur -Wado Bari/ waqooyi /Galbeed-Dhisme

   3. Laba Baloodh oo cabirkoodu yahay: - 48x18m

   Jihooyinkiisuna kala yihiin

   Koonfur/waqooyi-Wado Bari/Galbeed-Dhisme

   4. Baloodhka 4aad: - 24x18m

   Jihooyinkiisuna kala yihiin

   Bari/Koonfur-Dhisme Waqooyi/Galbeed-Wado

3. Waxa lagu Amarayaa Taliyaha Saldhiga Booliska Degmada Ibraahim Koodbuur inaad u Madax banaanaysid loo fuliyeyaasha iyo wakiilkooda

dhulkaas sare ku xusan cidii ka Hor Timaadana Madax Banaanaynta aad Hor Keentaan Sharciga.

4. Wuxuu soo baxay Amarkani Madax-banaanaynta ahi maanta oo taariikhdu tahay 21/09/016...

Allaa Mahad Leh....

Xaqsoore Waa Alleh....

(Maxamed Xuseen Caraale)

GARSOORAHA MAXKAMADA GOBOLKA M/JEEX

=HARGAYSA=